

FSO SFO

FAMILY SERVICES OTTAWA
SERVICES À LA FAMILLE OTTAWA

# Aqoonta Dhaqaale

## EE KANADIYAANKA CUSUB

**Dadka Kanadiyaanka cusub waxaa jira waxyaabo badan oo ay tahay inay ogaadaan marka ay yimaadaan Kanada - nidaamka guryaynta, waxbarashada, suuqa shaqada iyo luuqada rasmiga ah ee Canada, dhamaan inta ay la qabsanayaan bulshada iyo cimilada cusub.**

**Badanaa waxa aan la eegin baahida loo qabo fahanka nidaamka dhaqaale ee reer Canada.**

### Waa maxay aqoonta dhaqaale oo maxay muhiim u tahay?

Kaliya, aqoonta dhaqaale waxaa weeye fahanka sida aad u maamulayso lacagtaada iyo sida nidaamka dhaqaale ee reer Canada uu u shaqeeyo. Aqoonta dhaqaale waxay muhiim u tahay si aad u fahmi karto nidaamka dalkaaga cusub, inaad iska ilaaliso khaladaadka dhaqaale, iyo inaad maamusho lacagtaada kahor inta ayna ku maamulin.

# Bangiga Canada

Shanta bangi ee ugu waawayn Canada waa Bank of Montreal (BMO), TD Bank (TD), Scotia Bank, Royal Bank (RBC) iyo Canadian Imperial Bank of Commerce (CIBC). Waxaa jira bangiyo yayar oo kale oo aad isticmaali karto. Bangiyada qaar kaliya waxay bixiyaan adeegyo onleyn ah sida Tangerine iyo Simplii. Bangiyadani ma laha xaruma la tegi karo. Ururada Daymaha ayaa sidoo kale ah ikhtiyaaro bangi oo kale oo caan ah oo waxaa kamid ah ururada daynta sida Meridian, Desjardins, iyo Alterna. Ururada daymaha qaar ayaa u adeega aagag balaadhan ee degmooyin ah sida qaarna ay leeyihiin waaxyo yar oo aaga kaliya ku yaal. Waxa aad is barbar dhigi kartaa adeegyada ay bixiyaan oo waxa aad go'aansan kartaa bangiga ama ururka daynta ee adiga kugu haboon.




- Badanaa dadka reer Canada waxay isticmaalaan xisaabaadka jeega ee bangiga ama ururka daynta. Xisaabta jeegu waxaa weeye xisaab aad u isticmaali karto wixii maalin ah, oo waxa aad dhigan kartaa oo aad kala bixi kartaa lacagta aad u baahan tahay ee aad ku noolaanayso sida kirada iyo cuntada. Bangiyada iyo ururada daynta ayaa bixiya wax isku mid ah sida xisaabaadka jeegaga, xisaabaadka kaydka, kaadhka daynta iyo maalgelimaha.
- Xisaabta kayda looguma talo gelin in maalin kasta la isticmaalo laakiin waxaa weeye xisaabaad mustaqbalka loo dhigto lacagta. Bangiyadu waxay sidoo kale bixiyaan waxyaabo aad ku maal gashan karto lacagtaada sida Shahaadada Maalinta La Damaanad Qaaday iyo deeq lacageed oo laba geesood ah.



## CASHUURAAD

Cashuuraadka waxaa loo uruuriyaa qaabab kala duwan Canada. Badanaa waxa la iibsadanayo waxaa la socota cashuur. Taas macnaheedu waxaa weeye in qiimaha aad ku aragto shayga marka uu kabadhka tukaanka saaran yahay in aanu ahayn qiimaha aad bixinayso!

Ontario, Cashuurta Iibka (Harmonized Sales Tax, HST) waxaa weeye cashuur isku dar ah oo loo uruuriyo Dawlada Canada iyo Dawlada Ontario. HST waxay ku dartaa 13% badanaa iibka. Shayada qaar, sida cuntada, cashuurta waa laga dhaafay.

Cashuurta dakhliga waxaa laga jaraa mushaharkaaga kahor inta aanad qaadan. Cida aad u shaqayso ayaa cashuurta dakhliga u gudbisa Hay'ada Dakhliga ee Canada. Xadiga cashuurta ee aad bixinaysaa waxay ku xidhan tahay inta aad qaadato. Dadka lacagta badan qaata waxay bixiyaa cashuur badan oo laga jaro mushaharkooda. Lacagta cashuurta waxaa lagu bixiyaa adeegyada sida dugsiyada iyo daryeelka caafimaadka.

- Shaqaalaha Canada waxaa sidoo kale laga jaraa lacag mushaharkooda lagu bixinayo Caymiska Shaqada (Employment Insurance, EI) iyo Caymiska Hawlgabka Canada (Canada Pension Plan, CPP). EI waxaa weeye barnaamij ka caawiya dadka inay si kumeel gaadh ah u halaan dakhli hadii ay ka tagaan shaqada. CPP waxaa weeye barnaamij kayd dhaqaale oo waajib ah oo ah wakhtia hawlgabka la isticmaalo.

- Dadka reer Canada waxay "celinta cashuurta dakhliga" u xareeyaan Hay'ada Dakhliga Canada sanad kasta Abriil 30keeda. Kani waxaa weeye nidaamka lagu xaqiijinayo inaad bixisay xadiga cashuurta ee saxda ah sanad kasta. Hadii aad bixiso lacag badan, waa laguu soo celinayaa. Hadii aanad bixin intii loo baahnaa, waxaa lagaa qaadanayaa lacag dheeraad ah.

## WAX IIBSIGA

**Canada waxaa weeye mid kamid ah bulshooyinka caalamka ugu badan ee "lacagta cadaanka ah aan isticmaalin".**

Celcelis ahaan 80% dadka reer Canada waxay doorbidaan inay ku bixiyaan kaydhka daynta ama kaadhka kaydka. Kaadhka kaydku waxa uu kuu saamaxayaa inaad wax ku iibsato oo toos looga jaro lacagta xisaabtaada jeega. Badanaa xisaabaadka jeegu waxay leeyihiin kaadh kayd oo bilaash ah oo aad wax ku iibsan kartid. Kaadhka dayntu waxaa weeye kaadh loo isticmaalo in wax lagu bixiyo, shirkada kaadhka daynta ayaa siisa lacagta ganacsadaha, oo waa inaad shirkada kaadhka daynta ah aad u gudaa. Kaadhka kaydka waxaa sidoo kale lagu isticmaali karaa Automated Teller Machines (ATM) si aad ugala baxdo lacagta. ATM-yada qaar ayaad kaga shuban kartaa jeega iyo lacag xisaabtaada oo aad ku bixin kartaa wixii kharash ah.



# Daynta



**Bangiyada, ururada daynta, iyo hay'adaha kale ee dhaqaale waxay bixiyaan waxyaabo badan oo dayn ah. Daynta ayaa ah qaabka ugu badan ee loo daymaysoto laca si aad wax ugu iibsan karto iyada oo laga duulayo heshiiska inaad hadhaw gudi doonto. Ribadu waxaa weeye khidmada ay kaa qaadayso hay'ada dhaqaale marka ay ku daymiso lacag.**

## WAA KUWAN TUSAALW WAXYAABA UGU CAANSAN EE DAYNTU:

### DAYNTA GURIGA:

**dayn aad ku iibsanayso guri, taas o caadiyan aad ku bixinayso sanado badan (20-30 sano).** Waxa lagaa qaadayaa ribo ilaa inta aad wada gudayso daynta.

### DAYNTA GAADHIGA:

**daynta lagu iibsado gaadhiga waxaa bixin kara bangiga ama shirkada gaadhiga samaysay.** Caadiyan waxaa lagu bixiyaa mudo 4-7 sano ah. Waxa lagaa qaadayaa ribo ilaa inta aad wada gudayso daynta.

### KADHKA DAYNTA:

**Xisaabta daynta ee bangiga ama ururka daynta laga samaysto waxay kuu saamaxaysaa inaad daymaysato lacagta aad u baahan tahay.** Waxaa lagaa qaadayaa ribo xadiga aad daymaysatay ilaa inta aad wada gudayso.

### KAADHKA DAYNTA:

**Kaadhka aad isticmaali karto inaad wax kaga iibsato tukaanka iyo onleyn ahaan, badanaa waxaa loo yaqaan Visa ama Mastercard. Waxa bil kasta ay shirkada aad ka qaadatay kuu soo diraysaa biilka.** Caadiyan, hadii aad wada bixiso lacagta, ma bixinaysid wax ribo ah. Laakiin hadii aanad wada bixin lacagta oo dhamaystiran, waxa lagaa qaadi doonaa ribo.

*Digniin: kharashku waxa uu leeyahay shardiga "inta ugu yar ee la bixinayo". Hadii aad kaliya bixiso xadigaas, waxa ay qaadan kartaa sanado inaad bixiso lacag yar oo lagugu leeyahay. Rabiada ayaa sii kordhaysa, oo hadii aad bil kasta sii isticmaasho kaadhka marka aad wax iibsanayso, waxaa kugu adkaanaya inaad bixiso.* **Kaadhka dayntu waxa uu gacan ka gaystaa mushkilada dhaqaale hadii aan si taxadir leh loo isticmaalin.**

**Kaadhadh badan oo daynta ahi waa "bilaash" in la isticmaalaa ilaa inta aad bisha wada bixinayso.**

Laakiin, kaadhadhka qaar ayaa kaa qaadaya khidmad sanadle ah oo waxa uu leeyahay faa'idooyin dheeraad ah, markaa waxa aad si taxadir leh u wada akhridaa faahfaahinta kahor inta aanad dalban kaadhka daynta. **Kaadhadh badan oo dayn ah waxa ay bixiyaan abaalmarino lacag laguu soo celinayo ama meel aad u kaydsan karto si aad ugu socdaasho ama alaab ugu iibsato. Waxa aad fahantaa dhamaan kharashka la xidhiidha kahor inta aanad dalban.**

# DAYNTA DADKA REER CANADA EE CUSUB

**Hay'ada dhaqaale ayaa eegi doonta taariikhda maaliyadeed kahor inta aan lagu siin kaadhka daynta ama dayn. Waxay isticmaalaan "qiimaynta daynta". Qof ku cusub ahaan Canada, ma lihid qiimayn dayn. Waxa aad kala hadashaa bangigaaga ama ururka dayna ikhtiyaarada aad u qalanto ee wixii la daymaysanayo ah inta aad yeelanayso qiimayn daynta ah oo Canada gudaheeda ah.**

Waxaa jira laba shirkadood oo qiimaynta daynta sameeya Canada - Equifax iyo Transunion. Marka aad wax amaanato, mid ama labada shirkadood ayaa bilaabaya fayl garaynta daynta taariikhdaada daynta. Daynta waxa ay noqon kartaa agab wax tar leh. Badanaa dadka reer Canada ma iibsan karaan guriga hadii ayna daynta guryaha ku daymaysan. Daynta waxay sidoo kal noqotaa mushkilad hadii aan si taxadir leh loo isticmaalin. Xasuuso, dayntu maaha dakhli, oo waa in la gudo.

## MAALINTA BIXINTA DAYMAHA:

- Maalinta bixinta daymaha waxaa weeye dayn gaaban oo kuu sahlaysa inad daymaysato lacagta taas oo aad ku bixinayso wax ka yar 62 maalmood. Daymahan waxaa caadiyan lagu bixiyaa ribo badan iyo kharash dheeraad ah oo lagu daro. **Maalinta daynta la bixinayo waxa ay si dhakhso ah u noqon kartaa xadi aanad bixin karin. Waxaa wanaagsan inaad iska ilaaliso daymahan!**

## RIBADA:

**Ribadu waxaa weeye kharashka daymaysiga lacagta. Cida ku amaahinaysa ayaa kharash dheeraad ah kaa qaadi doonto (ribo) taas oo ay kuugu ogolaanayso daynta. Waxaa jira laba nooc oo ribo ah: mid fudud iyo mid laba laaban.**

- FUDUD
  **Waxaa weeye xadi ribo ah oo lagaa qaadayo xadiga aad damaysatay.**
  *Tusaale ahaan: hadii aad amaahatay $500 waxaana weeye ribada fudud 19%. Xadiga dhan ee aad gudaysaa waxaa weeye $595.00.*

- TA LABALAABAN
  **Waxaa weeye ribada ugu caansan. Waxaa lagaa qaadayaa xadiga aad daymaysatay iyo sidoo kale waxay ku biiraya ribadii hore.**
  *Tusaale ahaan: Hadii aad leedahay kaadhka daynta oo xadigiisu yahay $500.00 oo ribadiisuna yahay 19%, oo aad bishii inta ugu yar bixiso, waxa ay kugu qaadan kartaa 4 sano inaad gudo daynta kaadhkaaga daynta oo waxaa lagaa qaadayaa $216.43 dheeraad ah oo ah kharashka ribada. Wadarta guud ee aad gudayso dayntii ahayd $500.00 waxa uu markaa ay noqonaysaa $716.43.*

## TALAABADA XIGTA:

**Waxa aad doon doontanaa bangi ama urur dayn oo bixiya adeegyada aad u baahan tahay.**
Waxa aad eegtaa khidmada bishii ee xisaabta laga jarayo. Hay'ado badan oo dhaqaale ayaa bixiya xisaabaad kharash yar ama bilaash ah, markaa raadi. Furi xisaab jeeg iyo xisaab kayd si markaa aad u kala saaran karto xisaabtaada kaydka iyo xisaabta kaydka.

**Fahan dakhligaaga, kharashkaaga oo dejiso miisaaniyad.**

**La soco sida ay u baxdo lacagtaadu.**

**Kala hadal bangigaaga ama ururkaaga daynta wixii ku saabsan dhismaha taariikhda daynta ee Canada.** U isticmaal daynta si taxadir leh.



### BOOQO WEBSAYTKA HAY'ADA DAKHLIGA CANADA

**(https://www.canada.ca/en/revenue-agency.html)** si aad macluumaad badan uga ogaato Cashuurta Dakhliga iyo gunooyinka iyo barnaamijyada ay heli karaan dadka reer Canada.

*This program is funded by the Government of Canada and Women and Gender Equality Canada (WAGE) through the Canadian Women's Foundation.

**Family Services Ottawa** | 312 avenue Parkdale Ave. Ottawa ON K1Y 4X5
**info@familyservicesottawa.org** | T. 613-725-3601 **Translated into Somali*